Somalia Non-State Actors (SONSA)

Tell:252612008723, info@sonsaplatform.org, executivedirector@soscensa.org, www.sonsaplatform.org

Date:15th November, 2025

# Falanqayn Ku Saabsan Ansixinta Akhrinta 3aad ee Hindise-Sharciyeedka Ka-Hortagga Burcad-Badeedda iyo Af-Duubka (Sharciga Lr. 36 ee 30kii Abriil 1975)

## Hordhac

Ansixinta dib-u-habaynta **Hindise-Sharciyeedka Ka-Hortagga Burcad-Badeedda iyo Af-Duubka (Sharciga Lr. 36 ee 30kii Abriil 1975)** ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya 10kii Nofeembar 2025 waxay astaan u tahay marxalad muhiim ah oo lagu xoojinayo amniga badda iyo awoodda dawladnimada ee ku saabsan xeebaha iyo badaha dalka. Sharcigii hore ee 1975 waxaa lagu meel mariyey xaalad siyaasadeed iyo mid amni oo gebi ahaanba ka duwan tii maanta; tobannaan sano oo xasillooni darro ah iyo khataro amni badeed oo isbeddelay ayaa ka dhigtay in dib-u-eegis dhammaystiran ay noqoto lama huraan. Sharciga la cusboonaysiiyey wuxuu diiradda saaraya wax ka qabashada noocyada casriga ah ee burcad-badeednimada, af-duubka, kalluumaysiga sharci-darrada ah, iyo dambiyada kale ee badda oo si daran u saameeyay dhaqaalaha iyo bulshooyinka xeebaha Soomaaliyeed.

Dib-u-eegista sharciyeed waxay soo gebageboowday intii lagu guda jiray **fadhigii 13aad ee Kalfadhiga 7aad ee Baarlamaanka 11aad JFS**, kaas oo uu shir guddoominayey **Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Golaha Shacabka, BJFS Mudane. Cabdullaahi Cumar Abshirow**. Halka Mudane Xildhibaan **Maxamed Cabdullaahi Buraale Guuleed** uu soo bandhigay warbixintii guddiga iyo nuqulka wax-ka-beddelka, waxaana 140 xildhibaan oo kooramka fadhiga lagu furay ay si aqlabiyad ah u ansixiyeen sharciga la cusboonaysiiyay. Inkastoo codka mideysan uu muujinayo isku ra'yi siyaasadeed oo ku saabsan amniga badda, haddana tirada xildhibaannada ka qayb galay waxay iftiiminaysaa caqabado hareeyey hay'adaha sharci-dejinta – gaar ahaan soo xaadirista aan joogtada ahayn ee xildhibaannada taas oo saameyn ku yeelata matalaadda iyo daahfurnaanta golaha sharciga.

Qoraalkan falanqaynta ah wuxuu soo bandhigayaa aragti madax-bannaan oo ka timid bulshada rayidka, isaga oo qiimaynaya muhiimadda sharciga, isbeddellada lagu sameeyay, doorka guddiyada Baarlamaanka, ka qaybgalka bulshada rayidka, iyo sida uu sharcigan ugu biirinayo xoojinta maamul wanaagga badda iyo amniga fog ee Soomaaliya. Waxa kale oo uu iftiiminayaa sida sharcigan dib-u-habaynta ahi ugu dhex xirmayo baahiyaha gudaha ee dalka iyo nidaamka sharciyada badda ee caalamiga ah.

## 1. Soomaaliya iyo UNCLOS 1982

Ka qaybgalka Soomaaliya ee nidaamka sharciga caalamiga ah ee badda waxa uu soo bilaabmay in ka badan Afartan/40 sano kahor ee la soo dhaafay. Soomaaliya waxay **saxiixday Heshiiska Qaramada Midoobay ee Sharciga Badda (UNCLOS)** sanadkii **1982**, waxayna **meel marisay (ratify) bishii Luulyo 1989**, taas oo muujinaysa sida ay ugu hoggaansan tahay xeerarka caalamiga ah ee maamula badaha, aagagga dhaqaale ee gaar ahaaneed (EEZ), shelf-yada qaaradaha, iyo iskaashiga caalamiga ah ee lagula dagaallamayo burcad-badeedda. Waxaa xusid mudan in Soomaaliya **aysan wax ka reeb (reservation) ku samayn** heshiiskan, taasoo macnaheedu yahay inay si buuxda u aqbashay dhammaan qodobbadiisa, gaar ahaan **Qodobbada 100–107**, kuwaas oo qeexaya waajibaadka caalamiga ah ee la dagaallanka burcad-badeedda iyo awoodda sharci ee loo leeyahay qabashada, maxkamadaynta, iyo ciqaabta dambiyada ka dhaca badaha caalamiga ah.

Inkasta oo Soomaaliya ay si horey ah u gashay heshiiskan caalamiga ah, haddana burburkii dawladnimada ee muddada dheer socday ayaa si weyn u wiiqay awooddii dalka ee fulinta waajibaadyada UNCLOS. Hay'adaha badda oo tabar yar, la'aanta ciidan badeed shaqeynaya, iyo daciifnimada garsoorka ayaa ka dhigtay mid aan awoodin inay ilaaliso biyahaheeda iyo inay si sharci ah u wajahdo dambiyada badda ee isku dhafan. Sidaas darteed, Soomaaliya waxay noqotay mid si aad ah loogu yiqiin burcad-badeed sannadihii 2008–2012, inkasta oo ay UNCLOS u siinaysay awood sharciyeed buuxda oo ay ku ilaalin karto biyahaheeda.

Dib-u-eegista hindise-sharciyeedka ee la sameeyay **10kii Nofeembar 2025** ee Golaha Shacabka ayaa ah tallaabo weyn oo lagu yareynayo farqiga u dhexeeya waajibaadyada caalamiga ah ee UNCLOS iyo awoodda gudaha ee fulinta sharciga. Wax-ka-beddellada cusub ee lagu sameeyay sharciga—oo ay ka mid yihiin qeexidda burcad-badeedda, ballaarinta awoodda maxkamadeynta, iyo ku daridda erayo iyo fikrado la jaanqaadaya UNCLOS—waxay Soomaaliya u sahli doonaan inay si wax-ku-ool ah u hirgeliso heshiiska caalamiga ah ee badda. Iswaafajintani waxay kordhisaa kalsoonida caalamiga ah ee Soomaaliya waxayna xaqiijisaa in nidaamkeeda sharciyeed uu la jaanqaado heerarka badaha ee dunida oo dhan.

## 2. Iskaashiga Badda ee Caalamiga iyo Waajibaad Goboleedka

Maamulka badda ee Soomaaliya ma aha mid gooni u taagan; waxaa si toos ah u saamaynaya xiriirka juqraafiyeed, ganacsi, iyo amni ee gobolka iyo caalamkaba. Soomaaliya waxay ku taallaa mid ka mid ah marin-biyoodka ugu mashquulka badan dunida **Badweynta Hindiya iyo Gacanka Cadmeed** taas oo ka dhigtay in amniga badda Soomaaliya uu yeesho saameyn ballaaran oo ku saabsan maraakiibta caalamiga ah, ganacsiga, kalluumaysiga, iyo isu-socodka badeecadaha. Sidaa darteed, caqabadaha ay la tacaaleyso Soomaaliya waxay leeyihiin dhinacyo goboleed iyo kuwa caalami ah oo saameyn weyn ku leh biyaha Soomaaliya.

Muddo labaatan sano ka badan, Soomaaliya waxay qayb ka ahayd ama iska kaashatay dhowr hannaan oo caalami ah iyo kuwa goboleed oo lagaga hortago burcad-badeedda, laguna xoojinayo maamulka badda. Mid ka mid ah kuwa ugu muhiimsan waa **Heshiiska Jabuuti (Djibouti Code**

**of Conduct) ee 2009**, oo ah nidaam ay ku mideysan yihiin dalalka Bariga Afrika iyo Badweynta Hindiya si ay uga wada shaqeeyaan ka hortagga burcad-badeedda iyo weerarrada hubeysan ee ka dhaca badda. Ka qaybgalka Soomaaliya ee heshiiskan wuxuu fududeeyey wadaagista xogta, kordhinta kormeerka badda, iyo isku-dubaridka hawlgallada amniga.

Sidoo kale, Soomaaliya waxay si joogto ah ula shaqaynaysay **Hay'adda Badaha Adduunka (IMO)** oo bixisa taageero farsamo, tababarro, iyo talo sharci oo lagu horumarinayo badbaadada badda iyo awoodda fulinta sharciga. Dhinaca kalluumaysiga, Soomaaliya waxay la shaqeysaa Hey;adda Cuntada Adduunka ee **FAO** iyo **Guddiga Kalluumaysiga Badweynta Koonfurta Galbeed Hindiya (SWIOFC)** si wax looga qabto **kalluumaysiga sharci-darrada ah (IUU fishing)** oo muddo dheer dhabar-jab ku ahaa dhaqaalaha dalka. Waxaa sidoo kale jira iskaashi xooggan oo lala leeyahay **EU NAVFOR Operation Atalanta**, **Combined Maritime Forces (CMF)**, iyo **UNODC's Maritime Crime Program**, kuwaas oo taageera maxkamadeynta iyo xabsiga tuugada badda.

Iskaashiyadan caalamiga ah ayaa mar kale muujinaya muhiimadda ay leedahay in Soomaaliya yeelato **nidaam sharci oo gudaha ah oo casri ah**, kaas oo u sahlaya inay si hufan ula shaqeyso dalalka jaarka ah iyo kuwa caalamiga ah. Sharciga cusub ee lagu cusboonaysiiyay Ka-hortagga Burcad-Badeedda iyo Af-Duubka wuxuu Soomaaliya siinayaa awood sharciyeed oo ay ugu fududaato inay la socoto caddeymaha laga soo aruuriyo hawlgallada badda, u gacan-geliso ama ka guddoonto tuhmanayaasha, isla markaana si madax-bannaan u maxkamadeyso. Iyadoo aan sharcigan la casriyeyn, Soomaaliya waxay sii ahaan lahayd dal ku tiirsan gargaar dibadeed, halkii ay iyadu ka lahaan laheyd awood sharciyeed oo buuxda oo ay ku ilaaliso biyahaheeda.

## 3. Wax-ka-beddellada Hindise Sharciyeedka Qaab-dhismeed

Wax-ka-beddelladii lagu sameeyay Hindise-Sharciyeedka Ka-hortagga Burcad-Badeedda iyo Af-Duubka ee 10-kii Nofeembar 2025 waxay ka dhigan yihiin cusboonaysiin ballaaran oo qorshaysan oo lagu casriyeynayo gebi ahaanba sharciyada badda ee Soomaaliya. Sharcigii asalka ahaa ee 1975 wuxuu ka koobnaa qodobo kooban oo aan dabooli karin xaaladda daruufaha jira maanta ee dambiyada badda, kuwaas oo maanta noqday kuwo isku dhafan oo ay ku lug leeyihiin kooxo caalami ah, kalluumaysi sharci-darro ah, iyo falal ka dhaca meel ka baxsan biyaha Soomaaliya. Sharciga dib loo habeeyay wuxuu soo kordhiyay qeexitaanno casri ah, xoojinta awoodda maxkamadeynta, ciqaabo culus, iyo habraacyo kufilan.

Mid ka mid ah wax-ka-beddellada ugu muhiimsan waa **Qodobka 2 (Ujeeddooyinka)** oo hadda si cad u kala saaraya burcad-badeedda ka dhacda badaha caalamiga ah iyo af-duubyada ka dhaca badda Soomaaliya ama hawadeeda. Kala saaristani waxay u dhigantaa Qodobka 101 ee UNCLOS, kaas oo qeexaya burcad-badeedda oo ah dambi caalami ah oo lagu leeyahay awood maxkamadeyn oo baahsan. Tani waxay meesha ka saartaa mugdiga sharci ee caqabad ku ahaa dacwad-oogista iyo cidda awoodda u leh iyo halka lagu oogaya dacwadda.

**Qodobka 3 (Qeexitaannada)** ayaa dib loogu qoray si loo tirtiro erayo duugoobay loona waafajiyo xeerarka caalamiga ah. Waxaa lagu daray qeexitaanno muhiim ah sida *kaalmaynta*, *fududeynta*, iyo *ka qaybgalka* dambiyada burcad-badeedda, kuwaas oo horey u ahaa meel bannaan oo ay si fudud uga faa'iidaysan jireen kooxaha dambiyada badda.

**Qodobada 4 iyo 5** ayaa ballaariyay baaxadda dambiyada la maxkamadeyn karo. Marka lagu daro weerarrada burcad-badeedda ee wax iska dhaqan noqday, sharcigu hadda wuxuu si cad u mamnuucayaa **kalluumaysiga sharci-darrada ah ee ay sameeyaan maraakiib shisheeye**, falal aad u saameeyey kheyraadka Soomaaliya. Wuxuu kaloo daboolayaa af-duub, dhac badeed oo hubeysan, hijacking, iyo dhammaan falalka khatar gelin kara maraakiibta ganacsiga.

Sharciga sidoo kale wuxuu soo kordhiyay **xeerar ciqaabeed oo adag**, iyadoo xabsiyada lagu xukumayo lagu kordhiyay hab aad u waafaqsan heerka dambiyada badda:

- **5–20 sano** burcad-badeedda,
- **10–20 sano** af-duubka,
- **5–10 sano** kalluumaysiga sharci-darrada ah ee ay geystaan shisheeye.

Waxa intaas dheer, habraacyada baaritaanka iyo dacwad-oogista ayaa lagu waafajiyay **Xeerka Habraaca Ciqaabta (1963)** si loo hubiyo caddaalad, hufnaan, iyo in xuquuqda eedeysanaha iyo dhibbanaha labadaba la dhowro.

## 4. Doorka Guddiga Adeegga Garsoorka Baarlamaanka

Dib-u-habaynta Hindise-Sharciyeedkan Ka-hortagga Burcad-Badeedda iyo Af-Duubka waxaa si weyn u hoggaamiyay **Guddiga Adeegga Garsoorka**, kuwaas oo door muhiim ah ka qaatay isku xirka sharcigii duugga ahaa ee 1975 iyo baahiyaha amni iyo sharci ee casriga ah ee Soomaaliya. Guddigu, oo ku shaqeynayay mas'uuliyad sharci iyo mid dowladnimo, wuxuu sameeyay dib-u-eegis qoto dheer, iyago falanqeeyay aragtiyaha xildhibaanada ka dhiibteen, isla markaana ku daray talooyin ka kala yimid xildhibaannada, khubaro sharci, iyo daneeyayaasha badda sida la wariyay.

**Mudane Xildhibaan. Maxamed Cabdullaahi Buraale Guuleed**, oo ka tirsan guddiga, ayaa soo bandhigay warbixintii ugu dambeysay iyo qodobadii wax-ka-beddelka lagu sameeyay intii lagu guda jiray Akhrinta **Fadhigii 13aad ee Kalfadhiga 7aad ee Baarlamaanka 11aad**. Warbixintu waxay muujisay sida guddigu diiradda u saaray hagaajinta qeexitaannada sharciga, ballaarinta awoodda maxkamadeynta, iyo xaqiijinta in sharciga cusub uu noqon karo mid si dhab ah loo dhaqan-gelin karo gudaha nidaamka garsoorka ee Soomaaliya. Guddigu wuxuu sidoo kale carrabka ku adkeeyay sida ay lama-huraan u ahayd in sharcigan la casriyeeyo maadaama ay kordheen weerarrada burcad-badeedda iyo kalluumaysiga sharci-darrada ah ee badda Soomaaliya.

Si kastaba ha ahaatee, geeddi-socodka sharci-dejinta wuxuu sidoo kale iftiimiyay caqabado dhanka hay'adaha ka jira. Kaliya **140 xildhibaan** ayaa ka soo qayb-galay kulanka, inkasta oo Golaha Shacabka uu ka kooban yahay 275 xildhibaan. Joogitaanka oo aan joogto ahayn, maqnaanshaha

sababo la xiriira siyaasadda gudaha, iyo joojinta kal-fadhiyo badan oo quorum la'aan ah ayaa noqday arrimo caqabad ku ah kalsoonida shacabka iyo tayada sharci-dejinta. Waxay sidoo kale muujinayaan sida ay muhiim u tahay in la xoojiyo maamulka gudaha ee Golaha Shacabka iyo hab-raacyada isla-xisaabtanka.

Si kastaba, shaqada guddigu waxay muujisay horumar muuqda oo ka dhex socda hay'adaha sharci-dejinta ee Soomaaliya. Hab-dhaqanka isku-duubnida, diyaar u ahaanshaha xildhibaannada inay wax ku biiriyaan, iyo hab-raaca nidaamsan ee wax-ka-beddelka ayaa muujinaya horumar tartiib tartiib ah oo ku socda dhanka awoodda Baarlamaanka. Hase yeeshee, waxay muhiim u tahay in la sii xoojiyo joogitaanka xildhibaannada, anshaxa gudaha, iyo isla-xisaabtanka si loo hubiyo in dib-u-habeynada sharciyeed ee muhiimka ah ay helaan mudnaantooda.

## 5. Korjoogtada Bulshada Rayidka ee Golaha Shacabka BJFS iyo Isla Xisaabtanka Dimuqraadiga Ah.

Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ayaa door muhiim ah oo wax-ku-ool ah ka qaadata inta badan intii ay socotay doodda iyo ansixinta Hindise-Sharciyeedka Ka-hortagga Burcad-Badeedda iyo Af-Duubka ee la cusboonaysiiyay. Korjoogtada ka socday Xafiiska Dalladda Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee loo yaqaan (**Somalia Non-State Actors (SONSA)**, oo ka hawlgasha **Mashruuca Gole-Kaab** oo ah isku xeraha bulshada iyo golaha shacabka, ayaa ka qeybgalay dhammaan kulamada Baarlamaanka  oo ay ku jiraan kulamada aan caadiga aheyn iyo akhrinta saddexaad. Joogitaankoodu wuxuu dammaanad qaaday in geeddi-socodka sharci-dejintu uu ahaado mid daahfuran, la xisaabtan leh, oo si habeysan loo diiwaangeliyo.

Doorka Bulshada Rayidka wuxuu aad uga ballaaran yahay oo kaliya in ay goobjoog ka noqdaan kulamada. Iyagoo faafinaya xog ku saabsan tirada xildhibaannada xaadirtay, nidaamka codbixinta, sida loo dhowray, nidaamka fadhiga, iyo tayada doodda, ayay kor u qaadeen kalsoonida shacabka ee hannaanka sharci-dejinta ee dalka. Warbixinahooda waxay xaqiijiyaan in muwaadiniintu helaan xog lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan sida wakiilladoodu u fulinayaan waajibaadkooda, gaar ahaan marka la eego sharciyo saamayn weyn ku leh amniga qaranka.

Sidoo kale, kormeerka joogtada ah ee bulshada rayidka wuxuu iftiiminayaa arrimo ka baxsan sharciga laftiisa. Intii uu socday kalfadhiga 7aad waxaa jiray culaysyo la xiriira quorum-ka, iyadoo fadhiyo badan la hakiyey maadaama aysan joogin tiro ku filan oo xildhibaano ah. Kormeerka SONSA iyo bah-wadaagta kale ayaa muujiyey daciifnimada nidaamka joogitaanka xildhibaannada, iyagoo ku cadaadinaya hoggaanka Baarlamaanka in ay xoojiyaan anshaxa shaqada, nidaamka xaadirinta, iyo hababka isla xisaabtanka.

Inkasta oo bulshada rayidka aysan saameyn toos ah ku yeelan sharciga la ansixiyay, haddana doorkooda kormeerka ah wuxuu xoojiyaa qiyamka dimuqraadiyadda wuxuuna ka caawiyaa hay'adaha dawladda in ay u hoggaansamaan hufnaan iyo daahfurnaan. Gaar ahaan marka la eego sharcigan — oo muhiim u ah amniga badda iyo sumcadda qaranka — kormeerka bulshada rayidka

wuxuu dammaanad qaadaa in hab-socodka legislashinka uu ahaado mid sharciyad leh, la oggol yahay, oo u adeegaya danaha bulshada inteeda badan. Iskaashiga Baarlamaanka iyo bulshada rayidka ee ku saabsan sharcigan wuxuu muujinayaa horumar muuqda oo ku saabsan hannaanka dimuqraadiga ee Soomaaliya.

## 6. Saamaynta Amniga Badda iyo Caqabadaha Mudada Dheer

Badda Soomaaliya muddo dheer waxey u nuglaatay khataro isbiirsaday oo ay ka mid yihiin **burcad-badeednimo, kalluumaysi sharci-darro ah, ka ganacsiga tahriibka, iyo shabakadaha dambiyada xuduudaha badda ka gudba**. Caqabadahan waxaa kor u qaaday daciifnimada la'aanta hay'ado amniga xoogan, la'aanta ciidan badeed awood leh, iyo xeebaha oo aad u dhaadheer oo inta badan aan la ilaalin. Dib-u-habaynta Hindise-Sharciyeedka Ka-hortagga Burcad-Badeedda iyo Af-Duubka waxey ku soo beegantay waqti ay kooxaha dambiyada badda mar kale yeesheen firfircooni, waxaana tusaale cad u ah **afduubkii markab ganacsi oo caalami ah oo dhacay Nofeembar 2025** meel ku dhow Badweynta Hindiya ee Soomaaliya, taasoo muujinaysa in burcad-badeednimadu aysan dhammaanin ee ay weli tahay khatar dhab ah.

Sharciga dib loo cusboonaysiiyey wuxuu si weyn u xoojinayaa awoodda Soomaaliya ee ku aaddan ka hortagga, baarista, iyo maxkamadeynta dambiyada badda, isagoo bixinaya qeexitaanno cad, awood maxkamadeyn oo ballaaran, iyo ciqaabo adag oo la jaanqaadaya heerka dambiyada. Ballaarinta dambiyada lagu ciqaabo si loogu daro **kalluumaysiga sharci-darrada ah ee maraakiibta shisheeye** waa tallaabo muhiim ah, maadaama dhibaatooyinkan ay dhaqaale ahaan u burburiyeen kheyraadka badda Soomaaliya, islamarkaana ay kaalin ku yeesheen sababta dhalisay burcad-badeedda asal ahaan — taas oo ahayd ka falcelin bulshooyinka xeebaha oo ka jawaabayay kheyraadkoodii oo si sharci darro ah loo boobay.

Sharciga cusub wuxuu soo rogaa **ciqaabo adag oo u dhexeeya 5 ilaa 20 sano**, taas oo ujeedadeedu tahay in laga hortago shabakadaha dambiyada badda iyo in lagu muujiyo sida dowladdu u aragto khatarta ay leeyihiin falalkan. Waxaa intaas dheer, sharciga wuxuu xoojinayaa awoodda Soomaaliya ee ay kula shaqeyn karto ciidammada badmareennada caalamiga ah, waardiyayaasha badda, iyo hay'adaha gobolka ee ka hawlgala Badweynta Hindiya. Iyada oo qeexitaanka iyo awoodda maxkamadeyntu la caddeeyey, dalalka kale waxay si kalsooni leh ugu wareejin karaan tuhmaneenimada ay qabtaan dowladda Soomaaliya.

Sharciga dib loo qoray wuxuu sidoo kale kor u qaadaya kalsoonida maalgelinta gudaha iyo tan caalamiga ah ee ku saabsan ilaha badda, gaar ahaan **kalluumaysiga, dekedaha, iyo ganacsiga xeebaha**. Sidoo kale, wuxuu astaan u yahay soo kabashada hay'adaha dawladda, maadaama uu muujinayo in Soomaaliya ka go'an tahay inay dib u hantido baddeeda iyo inay si sharci ah u soo afjarto falalka ka jira biyahaheeda. Si kastaba ha ahaatee, sharciga keliya ma baabi'in karo dambiyada badda; hirgelintiisu waxay u baahan tahay **awood hay'adeed, isku-xirnaanta laamaha dowladda, ka-qaybgalka bulshooyinka xeebaha, iyo maalgelin joogto ah** oo lagu horumarinayo kaabeyaasha amniga badda.

## 7. Gabagabo

Dib-u-eegista iyo ansixinta Hindise-Sharciyeedkaan Ka-hortagga Burcad-Badeedda iyo Af-Duubka (Sharciga Lr. 36 ee 30kii Abriil 1975) waxay astaan u tahay tallaabo muhiim ah oo lagu xoojinayo amniga badda Soomaaliya, laguna adkaynayo madaxbannaanida qaranka, isla markaana lagu waafajinayo sharciyada gudaha ee dalka waajibaadka caalamiga ah ee uu qaaday. Dib-u-habaynta lagu sameeyay sharciga, oo la jaanqaadaysa **UNCLOS 1982** iyo habraacyada gobolka ee la xiriira amniga badda, waxay u oggolaanaysaa Soomaaliya inay si sharci adag ah u wajahdo caqabadaha muddo dheer halakeeyay dhaqaalaha iyo maamul wanaagga badda.

Si kastaba ha ahaatee, guusha sharcigan waxay si weyn ugu xirnaan doontaa sida looga hirgeliyo. Soomaaliya waa inay wax ka qabataa caqabadaha dhanka awoodda amniga badda, tabar-yarida hay'adaha fulinta sharciga, garsoorka oo awood badan u baahan, iyo joogitaanka aan degganayn ee xildhibaannada Baarlamaanka, si loo gaaro natiijooyin la taaban karo. Waxaa lama huraan ah in la xoojiyo awoodda booliska badda, la helo isku-xirnaan wanaagsan oo u dhaxaysa hay'adaha dowladda, lana dhiso xirfadaha baarista iyo dacwad-oogista.

Dhanka kale, korjoogteynta bulshada rayidka ee ay hogaaminayaan Dalladda Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee (**Somalia Non-State Actors (SONSA)** iyo **Mashruuca Gole-Kaab** ayaa sii ahaanaya laf-dhabarta isla xisaabtanka hannaanka sharci-dejinta iyo hirgelinta sharciga. Kormeer joogto ah oo dhinac walba leh ayaa muhiim u ah ilaalinta hufnaanta, kor u qaadista kalsoonida shacabka, iyo hubinta in sharciga loo adeegsado hab uu u waafaqsan yahay danta guud iyo maamul wanaagga.

Inkasta oo sharciga dib loo cusboonaysiiyey uusan keligii meesha ka saarayn dhammaan khataraha badda ka jira, haddana wuxuu dhigayaa saldhig sharci oo adag oo lagu dhisi karo mustaqbal fog oo amni leh. Haddii sharcigan lagu daro **go'aan siyaasadeed oo xooggan, maalgelin joogto ah, iyo iskaashi goboleed**, waxay u badan tahay inuu wax ka beddeli doono awoodda Soomaaliya ee ay kula dagaallamto burcad-badeedda, ilaaliso marin-biyoodka ganacsiga, una suurtogeliyaan jiilasha dambe nidaam badeed oo sharciyad leh oo ammaan ah. Waxa kale oo muhiim ah in dowladda ay hore u wadato ka-qaybgalka bulshada rayidka si loo helo hannaan amni badeed oo furan, hufan, oo waara.

Prepared by: Civil Society Working Group Under **Gole-Kaab** Project.

**Summarized by:** Mr. Mohamed Aded Ali, SONSA Executive Director & Director of Somali CSOs.

Office Address: Small Street (Laami Yare) Road @ KM5. Safari apartment @ KM5, Hodan District Website:. https://sonsaplatform.org/, https://golekaab.so/ Mogadishu - Somalia